Maxaa kula habboon haddii aad dooneysid Inaad Racfaan ka qaadato Go'aanka Xafiiska fedraaliga ee Socdaalka?

Ma rabtaan inaad Racfaan ka qaadato go'aanka diidmada ah ee aad ka heshay Xafiiska Fedraaliga ee Socdaalka?

Si degdeg ah u gaar, Garyaqaan ama Xafiis La-Taliye Sharciyeed midka kuugu dhaw, haddii aad rabto inaad Racfaan ka qaadato go'aanka diidmada ee lagaa gaaray. Haddii kale waxaa dhici karto, inuu kaa dhammaado waqtigii lagugu qabtay qaadashada Racfaanka. Haddii aadan heli karin Garyaqaan kuu dooda si deg deg ah ula xiriir Xafiiska Caawinta dadka Qaxootiga ee Swiiska „Schweizerischen Flüchtlingshilfe SFH" www.fluechtlingshilfe.ch, kaasoo ah mid ka madax bannaan Dawladda , ahna mid u dagaalamo raadinta xuquuqda dadka Qaxootinimada raadinaayo. Fadlan si dhab ah u akhri tilmaamaha isla markaasna si sax ah u raac.

1. Waxa loo baahan yahay inaad ogaato

➔ ***Waxaa hal mar qaadan kartaan Racfaan***

Waxaa laguuoggol inaad hal qaadato Rafcfaan. Maxkamadda Maamulka Faderaaliga ayaana Mas'uul ka ah. Waa Hay'adda ugu sarreysa oo iska leh gaarista go'aanka kama dambeysta ah ee Qaxootiga.Cinwaankeedu waa kan hoos ku qoran:

Bundesverwaltungsgericht,
Postfach, CH-3000 Bern 14, Telefon +41 (0)58 705 26 26, Fax +41 (0)58 705 29 80

➔ ***Waqtiga ha iska Lumin***

Hadii uu go'aanka diidmada ku soo gaaro si fiican u fiiri waqtiga laguu qabtay inaad go'aankaas Racfaan ka qaadan karto, waxaadna inta badan laga arkaa dhammaadka **Warqadda Go'aanka!** Halkaas waxaad ka garan kartaa muddada aad haysato. Inta badan go'aanadaas wuxuu ku yimaadaan labo nooc oo ah sida hoos ku qoran:

1. Mid laguugu sheegaayo in codsigaagii qaxootinimo **la diiday**. Waxaadna qabtaa muddo **30 maalmood** oo aad Racfaan ku qaadan kartid, laga bilaabo maalinta uu go'aanka ku soo gaaro, waana ay ku jiraan maalmaha Sabtida, Axadda iyo maalmaha Ciidaha kale.

2. Mid laguu sheegaayo in codsigaagii aanba la **Tixgelinba,** maadaama loo arkay mid aan salba lahayn oo aan meelmar ahayn. Kaasi waxaad u qabtaa oo keliya **muddo ah Shan maalmood oo shaqo**. **Iska row hadi o wadan qarada europ ka midh ah lagu dib celiyo rafcan ad dhibtey wakhti si jogi lahey ma dheeren donto!**

Si uusan waqtiga kaaga dhumin, waxaan habboon inaad marka hore Racfaan inaad qaadatay ku ogeysiiso ama u dirto Fax, adigoo u sheegaayo inaad caddeymaha iyo codsigaaga rasmiga ah aad dib dambe boostada ugu soo diri doonto.

2. Qaabka Dokumentiga

Waa inay si buuxda gacantaada ugu jiraan dhammaan dokumentiga aad u baahan tahay, haddii ay dokumentigaas uu ku jiro gacanta Xafiiska Socdaalka si degdeg ah u weydiiso

Si ay kuugu soo diraan, haddii ay jiraan caddeeymo cusubna waa inaad Racfaankaaga ku xirtaa.

Waxaa lagama maarmaan ah inaad **Cosiga Weydiisashada** markii aad qoreysid sida ku qoran Lifaaqa **A**. Inaad u raacdaa timaamahaan,✍ arag.

➔ ***U raac tilmaamahan xaraf xaraf:***

1	Macluumadka Shaqsiga ah, Cinwaankaaga (Macaga, Midka familkaaga, Taariikha dhalasho qof kasta uu khuseeyo go'aanka diidmada BFM, Lb. Waddada iyo goobta aad deggan tahay)
2	Meesha aad deggan tahay, iyo taariikhda maalinta aad warqadda qortay
3	Lambarka (waa kan lixda lambar ah oo ku qoran dhinaca biddixda ee go'aanka Xafiiska Socdaalka BFM)
4	Taariikhda warqadda Xafiiska Socdaalka BFM (ka fiiri dhinaca biddix ee kore ee warqadda BFM)
5	Waa inaad saartaa saxiixaaga codsiga Racfaanka
6	Codsigaas isagoo diiwaangashan (Registred) u dir ciwaankaan: Bundesamt für Migration, Quellenweg 6, 3003 Bern-Wabern.

Inta badan maalmo gudahood ayey kuugu soo gaarayaan dokumentiga aad codsatay. Sida caadada ahna kharaj dacwo looma baahno.

3. Habka loo diyaariyo Racfaanka

➔ ***Kaalmada Xafiiska Cayrta ma Heshaa?***
Haddii aad hesho, waa inaad ka **codsataa Xafiiska Cayrta** warqad caddeynayo inay kaalmo ku siiyaan**.** Warqaddaas waa inaad ku lifaaqdaa Dacwadda Racfaanka. Caddeyntaas waa inaad si uga dhaqsiyo badan u dirtaa, xatta haddii aad hesho waqti dambe.

➔ ***Sii wanaagsan u akhri ama u faham go'aanka Xafiiska Socdaalka..***
Si buuxda u dhuux qoddobada uu Xafiiska Socdaalka uu ku diiday codsaigaaga. Si uu Racfaankaaga u noqdo mid qoddabaas radiyeynaayo..

➔ ***Uruurinta Caddeymahaaga.***
Waa inaad dhammaan **caddeymaha aad haysato ku xirtaa Racfaankaaga** si uu Rafcaanka u noqdo mid si buuxdo u bandhigo karo **dacwaddaada,** gaar ahaan kuwii aadan horey u siin Xafiiska Socdaalka (Matalan: warqaddo caafimaad xumi, caddeymo ah in dalkaaga laguu xiray shari darro, go'aamo maxkamadeed oo sharci darro ah iwm). Waa inaad si buuxda isugu dubariddaa wixii dokumenti ah oo aad ku doodi kartid.

4. Sida loo qoro Racfaanka

Racfaanku waa inuu ku qoran yahay luqada Jarmalka, Fransiiska ama Talyaaniga midkood. waxaaba dhici karto inaad hesho qof yaqaano midkood kaalmana ka geysan qoraalka? Waxaad ka heleysan qaabka racfaanka hoos, nuqulka **B** . Waa muhiim in Qaabka **Formular aad si wanaagsan ugu buuxisaa macluumaadkaaga iyo xaalada shaqsiga ah.** Si toos ah ugu qoran Lifaaqa, adigoo raacaayo tilmaamha hoose ✍ arag. Haddii aad u baahato isticmaal waraaqo dheeri ah.

➔ ***U Buuxi Qaabkaan, u raac tilmaamaha* B *Xaraf xaraf:***

7	Goobta, Taariikhda
8	Cinwaankaga hoygaaaga (Macaga, Midka familkaaga, Taariikha dhalasho qof kasta uu khuseeyo go'aanka diidmada BFM, Lb. Waddada iyo goobta aad deggan tahay)
9	Taariikhda warqadda Xafiiska Socdaalka BFM (ka fiiri dhinaca biddix ee kore ee warqadda BFM)
10	Lambarka (waa kan lixda lambar ah oo ku qoran dhinaca biddixda ee go'aanka Xafiiska Socdaalka BFM

11 Waxaa **aad muhiim u ah inaad Racfaanka**. Ku caddeeyso sababaha aad ku aqbali karin go'aanka diidmada ee BFM iyo sabahaba aad u rabto inaad ku noolaato dalka Switzerland. Ku soo xir dacwadaada wixii caddeeymo dheeri oo aad haysato. Adigoo tixgelinaayo :

- Ka dood dhammaan qoddobka ay ku saleysan tahay diidmada BFM.
- Haddii ay diidmadoodu ku saleysan tahay inaysan rumeysnayn wareysigaagii, markaas si cad ugu soo bandhigo dacwadaada adigoo tilmaamaayo inuu wareysigaagii dhab yahay, haddi ay jirtay meelo is diidan ama is-khilaafsan, waa inaad si cad u saxdaa una macneysaa.
- Waa inaad caddeysaa wixii kuugu dhici karo haddii dalkaagii Hooyo laguu celiyo? Taassi si fiican u qeex, weliba wixii kuugu dhici karo, goobta wax lagugu geysan karo iyo ciddii kuu geysan karto.
- Waxaa habboon inaad dacwadaada u **Bandhigto si La rumeysan karo**, oo ah in lagu ugaarsanaayo (Matalan; warqadda Xabsi oo laguu jaray, go'aan maxkamadeed oo lagu eedeyey, caddeyn dakhtareed oo sheegeyso in jir dil laguu geystay, nuqulo jariidado oo caddeeynaayo in gef laguu geystay iwm.) adigoo qeexaayo micnahooda.

Macal rafcanka o lo qabtey wakhti gadheyso 5 malimod kaliyo:

Hadi adan waraqo dalxiis mise dokmentiyal o lagugu garto dhibi karin waxa si fican fasirad ta awgeed dhibta.

- Hadi ay shaqalah dowladeed u meleysid in ay arintada si gar ah eegan waxa sheegta wixi laga waraseyn laha (metelen wixi adiga la kulantay, ku sabsan siyasada ka jirto magalada ku nolan jirtey).
- Hadi ay wasarada BFM ay damacday in wadan kahor jogi jirtey ay rabto in dib kugu celiso waxa u fasirda sababta ta ka so horjeedo (metelen waxa ka baqanaysa in wadanka kadib isla marka toos kugu celiyo dalka ad ka timid. Waxad ku leydaha dalka swiserland dad qarabo mise dad ku dhow.)

Hadi wadan o qarada europ ka midh dib lagu celiyo, Norway mise Island: Iska row rafacankaga wakhtiga jogi laheyd ma si dheeren dono:

Macnahayda waxay tahay adigo kolkastaba rafacan dhibtey wadanka wa laga sari dona. Cadi ahan sida waxa lagu dhaqma hadi ad wadan o qarada europ ka midh ah jogi jirtey oglado in ay dib ku qadan. Waxad codsi dhibta in rafcankaga «wakhtiga dheereyo» in ad jogi kartid lo arko. Waxad fasirad dhibta sababaha jiro ad ka baqanaysid in u wadanka o qarada europ ka midh ah bila badhitaan dalka ad u dhalatay toos kugu celin dono mise wadankaga sabab weyn jirto in lagu fara xumeyo mise si lagula dhaqomo o hoos ku dhigi rabto.

12 Haddi aan laguu oggolaan sharciga qaxootinimada, waxaa dhici karto in lagu siiyo **Oggolaanshaha Ku-Meel Gaar ah oo ku noolaanta dalka Swiiska(Oggolaanshaha F), Taasi micnaheedu waa inaad hadda dalkaaga laguu celin karin, si bino'aadanimada laguu soo dhaweeyey.** Matalan haddii la garwaaqsado in dhibaatooyinka dalkaaga ka jiray aysan ahayn kuwa khatar ah, inta la ogyahay.

Ku qeex dacwaddaada dhamman wixii xoojin karo saldhigga dacwadaada oo aan ahayn kuwii aad horey u gudbisay oo timaamaayo in dalkaaga khatar ka jirto.

Matalan:

Sida sharciga lagu wafaqo (qodobka 3 sharciga magaangeliyo) waxa qaxontiga la qabila.

«Qaxonti wa qof o wadankisa misa dalka ugu dembeyey u ku nolan jirey dintisa, dhaxalkisa, jensiyadisa, urur gar ah u ka midh yahay mise siyasada u rumeysan yahay awgeed si daran lagu cadadiin jirey mise ka baqanayo in ay sidas lagu sameyo.

Waxa cadadiin daran lo arka in qofka naftisa khatar lo geysto mise xoriyadisa laga qado sida dhibato weyn ka so racdo una u dul qadan kareyniin.

Wixi o haweynta ku sabsan o sababo gar jirto wa in si goni ahan lo tixraca.»

- Haddii ay jirto sababo caafimaad oo aan dalkaaga laguu celin karin, sida jirooyinka aan dalkaaga lagu daaweyn karin ama aysanba suurto gal ahayn in meel aan ka ahayn dalkaan Swiiska ah adigoo caddeynaayo dhibaatooyinka kuugu imaan karo haddi lagu celiyo. Warsan Maxkamadda inay ku dir Takhaatiir Madax Bannaan oo derso arrintaada..
- Qeex in dalkaaga hooyo uu ka socdo **Dagaal Shacbi ah ama Kooxeedyo**, kuwaaso kuu keeni karo, dhac iyo dhimasho iyo khatar bini'aadnimoba
- Inta badan Xafiiska Qaxootiga BFM, wuxuu ku doodaadaa, **Inaad ku noolaan karto dalkaaga Hooyo meelo ka mid**, halkaasina aysan nolashaada halis ku jirin. Adigase aanaan rabin halkaas. Markaas waxaa lagaa baahan inaad sida ku doodaa:
  - Inaad goob waliba oo dalkaaga aadan ku noolaan Karin dhaqaale doon dartii (Matalan: aqoontaada darted, luqadaada ama xaaladaada shaqsiga awgeed iwm)
  - Inaysan goobtaas joogin wax ehel kuu ah (knad weligaa ku noolaal goobtaas, inaad isku luqad ahayn. Wax ehel ama macrifana aadan ku lahayn.)
  - Ama aadan ku noolaan karin goobtaas sababo la xiiriira inaad tahay qof da' ah, haweeyn keli ah, ama qoys weyn oo aan haysan dhaqaale ku filan iwm

13 Qeybta ugu hooseyso ee warqadda dacwadada ku soo xir dhammaan warqaaha caddeymaha oo dhab ah(original) nuqullada ama koobiga adiga hayso. Waxaad kaloo ku soo xirtaan go'aanka xafiiska Qaxootiga iyo kan Xafiiska Ceyrta. **Ka samee dhamman dokumantiga Racfaanka labo nuqul ama koobi.**

14 Hoosta ka saxeex dhamman seddexda nuqulba. **Dir labo nuqul ee Racfaanka** iyadoo ay la socdaan dhammaan doukumentiga(Warqadda Xafiiska Cayrta iyo wixii kaloo caddeymo ah oo aad hayso) u dir Xafiiska Maxakamadda Maamulka. P.O Box 3000 Berne 14. **Ilaali Waqtiga**

5. Maxaa la filan karaa?

Waxaad ka heli doontaa boostada warqaad ka socoto Maxkamadda Fedraaliga ee Maamulka. Raadi qof si wanaagsan kuugu fasiro warqadda. Habraacyo badan ayey ku imaan kartaa, laakin inta waxay ku timaadaan sida hoos ku qoran:

- Waxaa heli kartaa warqaad caddeneyso inay Maxkamadda Fedraaliga ee Maamulka **heshay warqaddii Dacwadda**. Inta ay dacwaddaada go'aan ka gaarayaana aad sii joogi kartid dalka Swiiska. Go'aanku wuxuu kuu imaan karaa beryo gudahood.
- Inay Maxkamadda Fedraaliga ee Maamulka u arki karto Racfaankaga **«hordhac ahaan inuusan Rajo»** lahayn. Sidaas darteedna loo baahan **Kharaj hormaris ah**. Waxaana laguu qaban karaa waqtiga aad kharajka bixineyso. Haddii aad kharajkaas bixin weydo, Dacwaddaada lama gudo gelaayo. Haddii aad bixisana, galka dacwaddaada waa la furayaa, iyadoo ay yar tahay fursadda guushaada.
- Maxkamadda Fedraaliga ee Maamulka waxay ku siin kartaan waqti yar oo aad Dawaddaas si fiican uga saxdaa qaladaada ku jiro . Waa inad si degdeg ah u jawaabtaa, haddii kale dacwaddaada ma noqon doonto mi sii fiican loo derso.
- Maxkamadda Fedraaliga ee Maamulka waxay awood kuu siineysaa inaad ka doodo go'aanka Xafiiska qaxootiga BFM. Marka isku day inaad Dacwaddaada si wanaagsan aad u qeexdaa.

Go'aanka **Maxkamadda Fedraaliga ee Maamulka** wuxuu noqon karaa mid ka duwan kii hore. Haddiise u yahay mid diidmo ah, waa inaad dalka Swiiska isaga baxdaa. Waxay kaloo Maxkamadda Fedraaliga ee Maamulka diidi kartaa go'aanka Xafiiska Qaxootiga BFM kaa gaaray iyadoo caddeeymo dheeri ah warsan karto dibna ugu celineyso Xafiiskaas . Wuxuu kaloo ay Maxkamadda go'aamin kartaa in loo oggolaado sharciga qaxootinimo buuxda, ama midka ku meel gaarka ah ee bini'aadanimada

Go'aanka Maxkamadda Fedraaliga ee Maamulka waa mid kama dambeys ah, mana jirto meel ka sarreyso oo dacwadda sii wadi karto. Taasi waxay ku suurtogeli kartaa oo keliya haddii ay jiraan arrimo gaar ahaaneed, taas ah Dib u Baaris ama dib u Beddelid Habraace. Fadlan arrintaas kala tasho Xafiis Gayaqaan (http://www.fluechtlingshilfe.ch/hilfe/nuetzliche-adressen).